Isku-xidhka Hawlaha Aadaminnimo ee Soomaaliya

SOMALIA NGO CONSORTIUM

Guudmar – Daabacaadda 1.0

Ujeeddada Guudmarkani waxa weeye sidii loo soo saari lahaa warbixin cad oo joogtaysan kuna qoran Ingiriisi iyo Af-Soomaaliba oo ku saabsan qaabka uu haatan yahay isku xidhka hawlaha binu aadanimo ee ka jira Soomaaliya iyada oo taa loo marayo hannaanka dib u habaynta hawlaha aadaminnimada oo ay hoggaaminayso Qaramada Midoobay, taasi oo ku salaysan dhismaha wada shaqayneed ee Hay'adaha aan dawliga ahayn iyo dariiqooyinka maalgalineed. Daabacadda koowaad waxay diiradda saaraysaa hawl ay Qaramada Midoobay hoggaaminayso oo is-beddel loogu samaynayo hawlaha binu'aadanimo iyada oo ay daabacaadaha tan ka dambeeyaana ay xoogga saarayaan tiirarka kale.
Daabacaddan waxaa soo saaray dalladda guud ee ururrrada aan dawliga ahayn ee Soomaaliya waxaanay qayb ka tahay ururrada aan dawliga ahayn iyo mashruuca wax-kabaddalka arrimaha binu'aadanimada qaybtiisa labaad. Fadlan ka eeg tafaasiil badan oo ku saabsan mashruucan mareegtan: www.humanitarianreformsomalia.info. Dallada mareegteeduna waa: www.somaliangoconsortium.org.

Wax-ka bedddelida isu-duwidda hawlaha binu'aadanimo ee Qaramada Midoobay

Hawlaha binu'aadanimada ee Qaramada Midoobay waxay ka kooban yihiin lix hay'adood oo ka mida Qaramada Midoobay oo kala ah: UNHCR, WFP, UNICEF, FAO, WHO iyo UNDP . Hay'adahani waxay ka hawlgalaan adduunka oo dhan iyaga oo ka jawaaba ka hawlgala hawlaha binu'aadanimo ee deg-degga ah ee ka jira wadamo kala duwan. Hay'ad kastaa waxay leedahay hab dawli iyo dariiqooyin maamul oo u gaara. Tani waxay ka dhigaysaa wada xidhiidhka lixda hay'adood mid adag, gaar ahaan xaaladaha cakiran ee degdegga ah ee ka jira meelaha ay ka mid tahay Soomaaliya.
Isku dayo badan baa la sameeyay sidii loo habayn lahaa hawlaha binu'aadanimo iyo sidii loo hubin lahaa xidhiidh wanaagsan oo ka dhexeeya lixda hay'adood ee u qaabilsan Qaramada Midoobay hawlaha binu'aadanimo. Sanadkii 2005, waxay Qaramada Midoobay bilawday sidii ay u badali lahayd qaabka ay ugu hawlgasho arrimaha binu'aadanimo ee deg-degga ah. Hawshan is-beddelka ahi waa ay socotaa wakhtigan hadda ah. Soomaaliya waxay ka mid tahay wadamada ugu horeeya ee laga hirgaliyay is-beddelkani. Is-beddelada waawayn waxay ahaayeen:

- ***XIDHIIDHIYAYAASHA ARRIMAHA BINU'AADANIMADA:*** si loo hubiyo in qof kali ahi uu ka masuul yahay hoggaaminta shaqooyinka xidhiidhinta arrimaha binu'aadanimo ee deg-degga ah.

- ***HAB KOOXAYN (CLUSTER) AH:*** si loo siiyo habdhis ku filan iyo in la saadaalin karo hoggaaminta dhamaan qaybaha uu ka kooban yahay arrimaha binu'aadanimo ee deg-degga ahi (sida, caafimaadka, waxbarashada, hoyga, Biyaha iyo Nadaafada, nafaqada, sugida cuntada, ilaalinta iyo qalabka)

- ***MAALIYADA ARRIMAHA BINU'AADANIMADA:*** isku dayga in hay'adaha ka shaqeeya bani aadannimada la siiyo maaliyad ku filan, isla markiiba ah, oo la bed-beddeli karo

- ***ISKAASHATO:*** in la kordhiyo iskaashiga ka dhaxeeyo hay'adaha Qaramada Midoobay iyo hay'ada aan ahayn ee ka jawaaba ama ka shaqeeya arrimaha binu'aadanimo ee deg-degga ah.

Hay'adaha aan ahayn Qaramada Midoobay ee ku lug leh arrimaha binu'aadanimada deg-degga ah iyo habka wax kabadalida arrimaha binu'aadanimada waa baanka aduunka, xafiiska caalamiga ah ee socdaalka, iyo Bisha cas oo ah hay'ad caalamiya oo isku dhafan. Hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa waddaniga ah ee ka shaqaynaya dhulka ay arrimaha binu'aadanimo ee deg-degga ahi ka dhacayaan waa inay ku lug lahaadaan hawsha waxkabadalka arrimaha binu'aadanimada. Marka la eego xaalada Soomaaliya, hay'adahan waxaa matala Dalada Hay'adaha Soomaaliya.

Isu-duwidda Hawlahaha Binu'aadanimo: Xaaladda gaarka ah ee Soomaaliya

Hawlgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya:

The UN Mission in Somalia is made up of three elements, a Humanitarian Mission, a Mission concerned with longer-term development, and a Political Mission. The unique nature of the humanitarian emergency in Somalia has resulted in a unique coordination structure.

Somalia does not have an integrated UN Mission, as in the case of most other countries (including South Sudan, for example) where all UN agencies whether humanitarian, developmental or political report to one person, normally the Special Representative of the Secretary General (SRSG).

In Somalia there is resistance towards a politicised Mission, and a widely held belief in the need for greater division between the Political and the Humanitarian Missions. Consequently, although the United National Political Office for Somalia (UNPOS) is headed by the Special Representative of the Secretary General (SRSG), the SRSG is does not lead the Humanitarian or the Developmental Missions.

Hawlgalka Binu'aadanimo ee Soomaaliya

Wadamada ay Qaramada Midoobay ku leedahay hawlgal arrimaha binu'aadanimada ah, koox ka arrimaha binu'aadanimda qaabilsan waddankaa ayaa la sameeyaa. Kooxda waddankaasi waxay masuul ka tahay isku xidhka ka hawlgalida arrimaha binu'aadanimo ee waddanka oo dhan iyaga oo la shaqaynaya hay'adaha Qaramada Midoobay iyo kuwa aan ahaynba.

Kooxdaasi binu'aadnimda qaabilsan waxaa la dajiyaa waddanka la tacaalaya arrimo binu'aadanimo oo deg deg ah. Laakiin xaalada waddanka Sooomaaliya, kooxda arrimaha binu'aadanimada waddanku waxay ku kulmaan dalka Soomaaliya la jaarka ah ee Kenya (Nairobi). Xubnaha kooxdani ka kooban tahay waxaa ku jira lixda hay'adood ee Qaramada Midoobay iyo hay'ado aan ka tirsanayn Qaramada Midoobay oo ay ku jiraan Baanka Adduunka, Xafiiska Caalamiga ah ee Socdaalka, Hay'ada Caalamiga ah ee Bisha Cas, iyo dalladda guud ee matasha hay'adaha aan dawliga ahayn ee ka hawlgala Soomaaliya. Kooxda arrimaha binu'aadanimada u qaabilsan Soomaaliya waxaa gudoomiya Xidhiidhiyaha Arrimaha Binu'aadanimada ee Soomaaliya oo ay shaqaalaysay Qaramada Midoobay xaruntiisuna tahay xafiiska hay'ada UNOCHA ee qaabbilsan Soomaaliya (Xafiiska UNOCHA ee qaabilsan Soomaaliya wuxuu hadda ku yaal Nairobi). Isbeddelka xagga amniga ee dhawaan ka dhacay Soomaaliya ayaa u suurto galiyay Qaramada Midoobay inay shaqaalaysiiso kuxigeenka xidhiidhiya arrimaha binu'aadanimo ee Somaaliya kaasi oo xaruntiisu tahay xafiis hoosaadka ay UNOCHA ku leedahay Muqdisho.

Hawlgalka arrimaha binu'aadanimada ee Soomaaliya waxaa dheer, Qaramada Midoobay waxay si joogto ah u joogaysaa Soomaaliya iyada oo xil ka saaran yahay kor u qaadidda horumarka fog. Hawlgalkan xaga horumarka ah waxaa hoggaamiya kooxda Qaramada Midoobay ee waddanka. Kooxda Qaramada Midoobay ee waddanku way ka baxsan yihiin kooxda arrimaha binu'aadanimada. Si ka duwan kooxda arrimaha binu'aadanimada, kooxda Qaramada Midoobay ee waddanku waxay ka kooban tahay oo kaliya hay'adaha Qaramada Midoobay waxaana gudoomiya Xidhiidhiyaha deeganaanshaha Qaramada Midoobay.

Laakiin Soomaaliya masuuliyadihii xidhiidhiyayaasha binu'aadanimada iyo daganaanshaha waa la isku daray oo waxaa labada xilba isku haya hal qof oo kaliya (Hada Mark Bowden). Tani waxay ku tusaysaa wakhtiga dheer iyo aasaaska joogtada ah ee uu la tacaalayay arrimaha binu'aadanimo ee deg-degga ah ee Soomaaliya ilaa 1995.

Kooxda binu'aadanimada iyo kooxda Qaramada Midoobay ee waddanku waxay uga shaqeeyaan Soomaaliya si barbaro ah waayo waxaa jira xaalado badan oo aanu jirin dariiq cad oo lagu kala saaro arrimaha binu'aadanimada iyo horumarka.

Xidhiidhka Binu'aadanimo

Xafiiska Qaramada Midoobay u qaabilsan xidhiidhinta arrimaha binu'aadanimo (UNOCHA) ayaa ka masuula gaadhsiinta arrimaha binu'aadanimo Soomaaliya. UNOCHA waxay deggan tahay xarunta guud ee Qaramada Midoobay ee ku yaal New York waxaa kale oo ay xafiis wayn ku leedahay Geneva iyo 30 xafiisyo goboleedyo iyo kuwa meelaha shaqadu ka socoto ku kala yaal oo uu ku jiro xafiiska Soomaaliya. Xafiiska UNOCHA ee Soomaaliya waxaa uu ku yaalaa Kenya waxaanu xafiis hoosaadyo ku leeyahay Mogadishu, Puntland iyo Somaliland. (Inkasta oo ay xaaladani is badalayso amaanka oo horumaray awgeed – ka eeg qaybta hoose xafiiska Soomaaliya ee UNOCHA).

Si la mid ah sida ay UNOCHA xafiis hoosaadyo ugu leedahay Soomaaliya si ay u daboosho qaybaha kala duwan ee Soomaaliya ayaa isku xidhka qaybaha kala duwan ee la tacaalida arrimaha binu'aadanimada loogu badiyay qaybaha kala duwan ee waddanka. Sida caadiga ah, koox qaybo ah uunbaa ka jirta waddankiiba laakiin xaalada Soomaaliya waxaa ka jira afar kooxood oo kala duwan oo qaybo qaybo ah xafiiska waddanka (oo ku yaal Nairobi) iyo Muqdisho, Puntland iyo Somaliland.

Kuma ayaa ka Masuula?

Isku xidhka arrimaha binu'aadanimo ee Soomaaliya waxaa hoggaamiya kooxda gargaarka binu'aadanimo ee waddanka kuwaasi oo uu hoggaamiyo isku xidhaha arrimaha gargaarka binu'aadanimo ee Soomaaliya kaasi oo si toos ah warbixinta ugu gudbiya isku xidhaha guud ee arrimaha binu'aadanimada oo xaruntiisu tahay New York (Wakhtigan aan qorayno qoraalkan waxaa kala haya Mark Bowden iyo Valeria Amos)

Kooxda Binu'aadanimada ee dalka iyo Xidhiidhiyaha Arrimaha Binu'aadanimada

Dardar galinta isku xidhka arrimaha binu'aadanimo wuxuu si buuxda ugu xidhan yahay xidhiidhiyaasha arrimaha binu'aadanimo. Halka masuuliyad hoosaadka isku xidhka gargaarka gargaarka binu'aadanimo ay dusha ka saraan tahay dawladaha qaran, hadii loo baahdo gargaar binu'aadanimo oo caalamiya, isku xidhaha binu'aadanimo ayaa ka masuula xidhiidhinta iyo hoggaaminta dadaalada ay wadaan ururrada ka shaqeeya arrimaha binu'aadanimada (Kuwa Qaramada Midoobay ka tirsan iyo kuwa aan ka tirsanaynba) isagoo eegaya inay iyagu ay yihiin kuwa ku taagan xeerar wakhtiyaysan, firfirxooni iyo waxtarna leh isla markaana ah kuwa wax ku kordhinaya ka soo kabashada fog.

Halka ay shaqadu ka socoto, iskuxidhaha binu'aadanimadu wuxuu masuul ka yahay inuu magacaabo hay'ado hoggaaminaya dhamaan qaybaha muhiimka ah ee uu ka kooban yahay latacaalida qaybaha binu'aadanimadu (Sida caadiga ah sugida cuntada, nafaqaynta, caafimaadka, biyaha iyo fayadhawrka, hoyga, ilaalinta, waxbarashada, iyo saadka) isagoo la tashanaya kooxda qaabilsan binu'aadanimada dalka.

Hay'adahan hoggaaminayaa waxay noqon karaan kuwa ka tirsan Qaramada Midoobay iyo kuwo aan

ka tirsanaynba (Tusaale ahaan waxay noqon karaan hay'ado caalamiya sida Merlin ama Oxfam)
Kooxda binu'aadanimada waddanku waxay ka kooban yihiin hay'adaha hoggaanka u ah kooxda iyo iskaashatooyin ka hawlgala la tacaalida arrimaha binu'aadanimada. Marka la joogo goobka shaqadu ka socoto, xidhiidhka ka dhaxeeya kooxda waxaa isu duba ridaa iyadoo loo marayo wada shaqaynta dhinacyada ay kooxdu ka kooban tahay. Afar ka mid ahina waxay ka jiraan Soomaaliya: Xafiiska guud ee waddanka (Nairobi), Muqdishu, Puntland iyo Somaliland.

Xidhiidhiyaha Binu'aadanimada ee Soomaaliya wuxuu ka hawl galaa xafiiska UNOCHA ee ku yaal Nairobi, Kenya. Kuxigeenka Xidhiidhiyaha Binu'aadanimo ayaa ka hawlgala xafiiska UNOCHA ee Muqdishu ku yaal. Ma jiraan wax shirar ah oo ay kooxda binu'aadanimo ee waddanku ku yeeshaan gudaha Soomaaliya, haseyeeshee waxaa jira shir madaxeed ay yeeshaan madaxda lixda hay'adood ee ka tirsan Qaramada Midoobay. midoobay. Shirkan wuxuu kaga duwan yahay ka ay yeeshaan kooxda binu'aadanimada ee waddanku, shir madaxeedkan kama soo qayb galaan ururrada aan ahayn Qaramada Midoobay sida hay'adaha caalamiga ah. Hay'adaha Qaramada Midoobay ka tirsan ee ka qayb gala shir madaxeedkan waxay xubno ka yihiin kooxda binu'aadanimada ee Soomaaliya.

Xafiiska UNOCHA ee dalka Soomaaliya

Ilaa hada waxay UNOCHA xafiiyadeeda waawaayn ee Soomaaliya ku leedahay Kenya (Nairobi) waxaa kale oo ay xafiisyo hoosaadyo ku leedahay Mogadishu, Somaliland (Hargeisa), iyo Puntland (Garowe). Si kastaba ha ahaatee, hawlgalka binu'aadanimo ee Qaramada Midoobay waxaa uu hada u guurayaa Soomaaliya oo xafiiska Mogdishu ma noqon doono xafiis hoosaad. Tani waxaa dhabaynaya in xafiiska guud ee UNOCHA uu yahay xafiiska Mogdisho ay ku leedahay UNOCHA. Sida dhabta ah wakhtiga xafiiska guud ee UNOCHA waxaa kala qaybsada Nairobi iyo Mogadishu. Kuxigeenka madaxa xafiisku wali wuxuu ku sugan yahay Nairobi. Xafiiska Guud ee UNOCH ee Soomaaliya waxa uu toos warbixinta ugu gudbiyaa xidhiidhiyaha binu'aadanimada ee Qaramada Midoobay oo ku sugan Nairobi.

Xafiiska UNOCHA ee Soomaaliya waxaa uu Nairobi ka maamulaa xidhiidhka siddeed kooxood oo kala ah: sugida cuntada, caafimaadka, nafaqaynta, biyaha iyo fayadhawrka, ilaalinta, waxbarashada, hoyga iyo saadka waxaana uu ugu yeedhaa "Kooxaha heer waddan". Kooxdan heerka waddan ah waa in laga sameeyaa saddex jeer meel hoosaad kasta. Tusaale ahaan Mogadishu, Somaliland iyo Puntland.

Hase yeeshee sida ay qayb walba u eegto qayb hoosaad kasta waxay ku xidhan tahay tirada shaqaalaha la helayo ee ay ka go'an tahay xidhiidhinta hawlaha qaybaha, awooda iskaashato ee hay'adaha Qaramada Midoobay ka tirsan iyo kuwa aan ka tirsanaynba iyo inta ay leegtahay arrimaha binu'aadanimo ee ka dhacaya dhulka.

Qaabka Iskooxaysiga

Iskooxaysigu waa kooxo ururo binu'aadanimo (Kuwa Qaramada Midoobay ah iyo kuwa an ahayn) oo ka shaqaynaya qaybaha waawayn ee arrimaha binu'aadanimo (Hoy, Nafaqayn, caafimaadka iyo wixii la mida). Waxaa sameeya Qaramada Midoobay marka: a) baahi binu'aadanimo oo ku salaysan qaybo la cayimay ay jirto b)marka ay jiraan kooxo ururo kala duwan ah oo ka shaqaynaya qayb isku mid ah c) awoodaha dawliga ahi marka ay u baahan yihiin taageero xaga isku xidhka ah

Xidhiidhka kooxdu waa inuu taageeraa masuuliyadaha waddaniyadeed iyo hoggaanka meelaha tixgalinta mudan. Meelaha ay ka jiraan maamul fir fircoon (Sida Somaliland iyo Puntland) kooxdu waxay la shaqaynaysaa laamaha dawlada ee loo qoondooyey. Kooxaha waxaa saraan masuuliyad ah inay bixiyaan meel cad oo lagala xidhiidho iyo inay lagala xisaabsamo gargaar binu'aadanimo oo ku filan ahna mid ku haboon. Kooxaha waxaa loo qaabeeyay inay sameeyaan iskaashatooyin ka dhaxeeya hay'adaha caalamiga ah ee binu'aadanimada ka shaqeeya, dawlada waddanka iyo dawladaha hoose, iyo bulshada rayidka ah.

Koox kasta waxaa hoggaamiya xidhiidhiyaha kooxda. Xidhiidhiyaha kooxdu wuxuu ku shaqeeyaa isaga oo matalaya kooxda oo dhan, isagoo fudaydiya shaqooyinka kooxda, sameeya oo joogteeya aragtida fog iyo qorshaha shaqo. Xidhiidhiya kooxda waxaa sida caadiga ah maalgalisa UNOCHA waxaase uu ka iman karaa mid ka mida hay'adaha Qaramada Midoobay ama hay'ad madaxbanaan oo ka hawlgasha meeshaasi.

Laakiin, waxaa muhiim ah, UNOCHA ma shaqaalaysiiso xidhiidhiyayaasha kooxaha kama hawlgalaan xafiisyada UNOCHA. Laakiin waxaa xidhiidhiyayaasha kooxaha sii wada shaqaalaysiintooda hay'ada hoggaanka u ah kooxda ama ururka laga soo kaxaystay (sida UNICEF, UNHCR, Oxfam, Merlin iyo kuwa la midka ah). Xidhiidhiyaasha kooxdu waxay warbixinta u gudbiyaan maamulahooda tooska ah ee hay'adooda ama ururkooda waxaanay ka hawlgalaan xafiiska hayaadooda ama ururkooda. Tani macnaheedu waxa weeyi inaanay xidhiidhiyayaasha kooxdu aanay fadhiisan xafiis isku mid ah .

Maxaa ka jira dhulka?



From 2012 to 2013 OCHA will move its entire country office from Kenya into Somalia. The Mogadishu Sub Office will be expanded to accommodate more staff relocating from Nairobi.

UNOCHA waxay waddanka Somaliya gudihiisa ku leedahay todoba xafiis. Waxay ku kala yaalaan Muqdisho, Dolow, Beledwayne, Galkacayo, Garoowe, Bosaaso iyo Hargaysa

Xafiis kasta waxaa madax ka ah sarkaal arrimaha bini'aadminimada ah kaasoo islamar ahaantaa ah maamulaha xafiiska (badanaa aan soomaali ahayn).

Sarkaalka arrimaha bini'aadanimada waxa kaalmeeya ugu yaaran hal qof oo xeeldheere arrimaha bini'aadanimada ah laga shaqaalaysiiyo gudaha soomaaliya.

Xafiiska Beledwayne malaha sarkaal arrimaha bini'aadanimada ah, ka hargaysana waxa uu ku gudo jiraa qabanqaabada inuu shaqaalysiiyo sarkaal arrimaha bini'aadanimada ah.

Inta lagu gudo jiro 2012-2013 waxay OCHA guud ahaan xafiiskeeda waddanka kasoo rari doontaa Kenya una rari doontaa Soomaaliya.

Iyadoo ay qayb ka tahay guuritaanka UNOCHA u guurayso Soomaaliya waxay xafiis ka aasaastay Doolow, kaas oo u adeega gobollada Gedo, Bay iyo Bakool. Xafiiska Muqdisho waxa uu bilowga u adeegi doonaa Banaadir iyo shabeelooyinka. Xafiiska gaalkacayona wuxuu u adeega koonfurta Mudug, Galmudug iyo Hiiraan waxaanay UNOCHA qorshaynaysaa inay adeegeed ku fidiso qaybo ka mid ah Koonfurta iyo Badhtamaha. UNOCHA waxay sidoo kale ka shaqaynaysaa isku dubaridka Jubooyinka. Imika ahaan shaqaalaha ka shaqaynaaya Jubooyinka fadhigoodu ma noqon koro Dhoobley. Taa badalkeeda waxay ku dhexwareegaan Dhadhaab iyo Libooye.

Puntland

2010 Puntland waxa laga magacaabay wasiirka qorshaynta oo ah wasiirka furaha u aha isku dubaridka arrimaha bini'aadaminimada. Wakaalada Maamulka Masiibooyinka iyo arrimaha bini'aadaminimada ee Puntland ee marka magaceeda lasoo gaabiyo la yidhaahdo (HADMA) ee la aasaasay 2005 ayaa imika waxay lamaane farsamo u tahay OCHA.

2011 madaxda Puntland iyo ururrada bini'aadanimadu waxay ku heshiiyeen in la isku duborido gurmadka bini'aadaminimada iyadoo loo marayo lix siyaabood:(1) ilaalin iyo hoy (2) beeraha iyo nolosha/gargaarka cuntada (3) waxbarashada (4) biyaha iyo nadaafada (5) caafimaadka iyo (6) nafaqaynta. Madaxda Puntland iyo isku duburidayaasha lixdaa qaybood ayaa si wada jir ah u gudoomiya kulamada.

Hay'adaha Qaramada Midoobay ee ka shaqeeya Puntland waxa ka mid aha: UNICEF, WFP, ILO, UN-Habitat, UNHCR, WHO, UNDP, FAO, UNESCO, UNDSS, OCHA, UNFPA, UNIFEM.

UNHCR waxa maamulka kala shaqeeya qaybta Puntland u qaabilsan dadka gudaha ku bara kacay ee uu sameeyayay isku dubaridaha arrimaha bini'aadaminimada. Qaybta qaabilsan dadka gudaha ku barakacay waxay ka shaqaysaa taageerida iyo ilaalinta soo galootiga xayirmay. Waxa xubno ka ah

hay'ada Qaramada Midoobay u qaabilsan socdaalka, golaha qoxoontiga ee Denmark, golaha qoxoontiga ee Norway iyo maamulada degaanka.

Somaliland

Shaqaalaha Qaramada Midoobay ee Hargaysa (UNHT) waxa fadhi u ah xafiis hoosaadka Somaliland.
UNHT waxay hoos tagtaa shaqaalaha Qaramada Midoobay u qaabilsan waddanka ee fadhigoodu yahay Nairobi, inkastoo ay kooxda Hargaysa (UNHT) ay xooga saaraan horumarka Somaliland, kooxdan shirarkeeda waxa ka mid ah xog isa siinta arrimaha bini'aadaminimada. Koox shaqeedka isku dhafan ee Somaliland si joogta ah ayay u kulmaan todoba ka mid ah sideeda qayboodna way ka shaqeeyaan waddanka. Dhamaan gargaarka caalamiga ah waxa la xisaabtama wasaarada qorshaynta iyo horumarka qaranka. Labada wakaaladood ee ay UNOCHA wada shaqaynta dhow la leedahay waa hayada maamulka ka hortaga masiiboyink iyo cilmibaadhista degaanka (NERAD) iyo wasaarada dib udajinta.
NERAD waxay warbixin siisaa gudiga masiibooyinka qaranka (ka kooban todoba wasaaradood gudoomiyana uu yahay madaxwayne ku xigeenku). Wasaarada dib udajintu waa wasaarada dadka gudaha ku bara kacay waxaanay masuul ka tahay arrimaha dadka gudaha ku bara kacay ee Somaliland.
UNOCHA iyo wasaarada dib udajint waxay si wada jir ah gudoomiye uga yihiin koox ka shaqaysa dadka gudaha ku bara kacay. Ma jiraan kulamo joogta ah oo dhexmara UNOCHA iyo NERAD.

Maal galinta gargaarka bini'aadaminimada

Maal galinga hawlgalada aadaminimo waxaa loo maraa hannaanka codsiga ee ay hirgaliso Qaramada Midoobay, waxaan maamula isku duba ridaha arrimaha bini'aadminimo isagoo u maraya qaab dhismeed qaybo ah. Hanaanka codsi waxa u ku dabaqanyahay kharashaadka ka yimaada sanduuqa bini'aadaminimada guud.

Kooxda ururrada aan dawliga ahayn ee Somaaliya

Kooxda ururrada aan dawliga ahayn ee Soomaaliya waxa markuu ugu horaysay la aasaasay 1991 si loo horumariyo isku dubaridka gargaarka caalamiga ah korna loogu qaado joogitaanka iyo taariikhda matalida ururrada aan dawliga ahayn gudaha qaabdhismeedka isku dubaridka gaarka Soomaaliya. Kooxdu waxay ka shaqaysaa inay la qaybsato xogta iyo falanqaynta ku saabsan qodabada muhiimka ah, qalqaaliso isku dubarid dhow, u doodid wada jir ah iyo wakiilnimo lala yeesho maamulada gudaha, hanaanka Qaramada Midoobay iyo deeqbixiyayaasha.
Kooxdu waxay ka koobnayd 87 xubnood (august 2012) oo isugu jira ururuda aan dawliga ahayn ee degaanka iyo kuwa caalamiga ahaba. Kooxda waxa xarun u ah Nairobi Kenya waxaan matala bar xudun aha taas oo ay caawiyaan laba bar xudun ku xigeen, isku duba ridaha gobolka waxa taageera goobo xudun ah oo Somaliland iyo Puntland ku yaal. 2009 hab tabarucaadkii goobaha xudunta ah ee Nairobi waxa loo rogay goobo xirfadeed oo taageero maaliyadeed ka hela deeqda deeq bixiyayaasha iyo taageero maamul oo ay ka helaan hay'ada marti galisa (2009-2012 CARE Internationl). Sanadkii 2011 hab tabarucaad goobaha xudunta ah ee gobolada ayaa dib loo eegay waxaana la doortay in xubinimadu ay xirfadayso goobaha gobolada. Habkani waa uu socdaa hada. Goob xudun goboleed oo xirfadaysan ayay Somaliland leedahay waxaana saldhig u ah Hargeisa iyadoo ay goob xun goboleedii Puntland ay si tabaruc ah u taageerto KISIMA. Tibaax tixraaceedyo ayaa hada la samaynayaa si loo unko goob xudun goboleed Muqdisho. Goobta xudunta aha waxa la tatiya gudi jihayneed oo sanadle loo doorto, waxaana taageera koox shaqaale ah oo dhanka maamulka ah.

Isku duba ridka bulshada rayidka ah ee soomaalida

Waxa jiro tiro kooxo dalada ah dhamaan qaybaha soomaaliya kuwaasoo isu keena ururrada aan dawliga ahay eek ala duwan si ay isugu dubaridaan shaqadooda, uguna heshiiyaan ujeedooyinka guud isuguna sar gooyaan qorshayaashood doodista ah.
Xogtani waa ay isku xidhantahay hadda waxaana ku jiri doona daabaacaadda kuxigta aragtidan guud.

Dhamaad

Ururrada aan dawliga ahayn iyo mashruuca dib u habaynta bini'aadaminimada wajiga labaad waxaa maal galiyay qaybta Guddida Gargaarka Bini'aadminimada ee Reer Yurub (ECHO).

EUROPEAN COMMISSION
Humanitarian Aid and Civil Protection

Endnote:
Koox/unug (cluster/clustering): Koox/unug waxaa loola jeedaa koox hawleedyo isku shaqo ah.